OREGON CENTER FOR CHILDREN AND YOUTH WITH SPECIAL HEALTH NEEDS

# Health Emergency Ready Oregon

## Xaaladda degdeg ah, daqiiqad walba waa lagu xisaabtamaa.

HERO Kids

## Macluumaad loogu talo galay qoysaska

### Waa maxay Diiwaanka HERO Kids Registry?

HERO Kids Registry waa nidaam si iskaa ah wax u qabso oo lacag la'aan ah kaas oo u oggolaanaya qoys walba oo Oregon ah inuu wadaago macluumaad muhiim ah oo ku saabsan caafimaadka ilmahahooda *ka hor* xaaladda degdeg ah. Macluumaadka ayaa si degdeg ah oo fudud u heli karaan adeegyada degdeg ah ee caafimaadka (emergency medical services, EMS) iyo adeeg bixiyaaha waaxda xaaladda degdeg ah ee isbitaalka (emergency department, ED), sidaa darteed waxay heystaan macluumaadka ay u baahan yihiin marka ay u baahan yihiin.

### Yaa waye HERO KIDS?

**HERO Kids waxaa loogu talagalay ilma walba oo reer Oregon ah ama qofka dhalinyarada (ilaa da'da 26).** Waxay muhiim gaar ah u leedahay dhalinyarada qaba xaaladdaha caafimaadka xanuunada daba dheeraada , kuwa la kulma naafanimada koriimada ama xaaladdaha caafimaadka dhimirka.

### Waa maxay sababta aan u diiwaangelinayo cunugeyga?

Xaaladda degdeg ah, daqiiqad walba waa lagu xisaabtamaa. Iska diiwaangelinta HERO Kids,waxaad siineysa adeeg bixiyayaasha EMS iyo ED bilowga madaxa fahamka taariikhda caafimaadka ee cunugaaga, baahiyaha gaarka ah iyo taageerada shakhsi ahaaneed. Tusaale ahaan, waxay ka caawineysa ka jawaabayaasha xaaladda degdega ah inay ogaadaan haddii bukaanka dhalinyarada ah aanu hadlaynin.

### Sidee ayay u shaqaysa?

1. Xaaladda degdega ah, qofka soo wacaya 911 ayaa siinaya shaqaalaha qabanaya wicitaanka lambarka Aqoonsiga ee cunugaaga HERO Kids Registry, ama wuxuu u sheegaya iyaga inuu cunuga diiwaangashan yahay.
2. Marka ay ogaadan adeeg bixiyaasha EMS iyo ED inuu cunugaaga diiwaangashan yahay, waxay ku heli karaan macluumaadka aad siiisay in ka yar 90 mirir, iyadda loo marinayo khadka adeeg bixiyaha ee qarsoodiga ah ama Emergency Department Information Exchange.

### Yaa heli kara HERO Kids Registry, miyayna xafidan tahay?

Si loo ilaaliyo dahsoonaanta iyo qarsoodiga, dadka soo socda oo kaliya ayaa isticmaalaya Registry:

- Waalidka ama masuulka sharciga ee diiwaangelinaya cunuga
- Dhalinyarada da'yarta ah ee is diiwaanelineysa
- Shaqaalaha HERO Kids Registry, kuwaas oo dhammaan u tababaran u hogaansamida sharciyada qarsoodiga ah ee caafimaadka (HIPAA)
- Adeeg bixiyayaasha Oregon EMS iyo Oregon ED ee daawaynaya cunuga

Macluumaadka dheeriga ah
www.herokidsregistry.org
herokids@ohsu.edu
Xafiiska ganacsiga: 833-770-4376

OHSU

## Yaa cusbooneysiinaya diiwaangelinta cunugeyga, marka isbeddel jiro?

Waalidiinta ama masuuliyiinta sharciga ah ayaa cusbooneysiinaya macluumaadka cunugooda ah ee HERO Kids Registry marka loo baahan yahay. Dhalinyarada da'yarta ah ee is diiwaangelisay ayaa cusbooneysiineysa macluumaadkooda.

## Sidee ayaan cunugeyga u diiwaangelinaya?

1. Soo ururinta macluumaadka caafimaadka ka jawaabayaasha ay u baahan karaan. Tani waxaa ku jira baaritaanada, daawoyinka, xasaasiyadaha, warqaddaha nidaamka xaaladda degdeg ah, foomaamka macluumaadka xaaladdaha degdega ah, iwm. Booqashada kadib soo koobida ayaa ilo fiican u noqon kara in badan oo macluumaadkan ah.
2. Is diiwaangelinta onlaynka (kumbiyuuterka ama tablet oo kaliya) www.herokidsregistry.org. Haddii aad doorbideyso warqad, waxaad codsan kartaa foomka adiga oo imayl u diraya herokids@ohsu.edu.
3. Shaqaalaha HERO Kids Registry ayaa furaya is diiwaangelinta. Haddii uu dhib jiro, iyaga ayaa kula soo xiriiri doonaa si loo xaliyo.
4. Dhowr toddobaad gudahood, waxaad boostada ku heli doontaa baakad xaqiijinta oo ku jirto soo dhawaynta, istiikarada, sumada boorsada dhabarka oo leh lambarka Aqoonsiga HERO Kids Registry.

FIIRO GAAR AH: Dhalinyarada jirta 15-26 sano ayaa is diiwaangelin kara.

## Dhakhtarka cunugeyga ma abuuri karaa ama cusbooneysiin karaa is diiwaangelinta?

Waalidiinta, masuuliyiinta sharciga ah, iyo dhalinyarada jirta 15-26 oo kaliya ayaa abuuri karaa ama beddeli karaa isdiiwaangelinta? Waxaad la shaqayn kartaa adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka si loo hubiyo macluumaadka inay saxan yihiin oo ay dhammaystiran yihiin.

## HERO Kids miyay u tababaraan EMS inay maareyaan xaaladdaha adag ee caafimaad ama caafimaadka dabeecada?

Maya. HERO Kids waxay wadaagtaa macluumaadka aad siiyey Diiwaan hayaha, si ay uga caawiso inay bixiyaan xog-ogaalka wanaagsan ee daryeelka xaaladda degdeg ah iyo adeegyada.

## Sidee ayaan u cusbooneysiin karaa macluumaadka ama u joojin karaa is diiwaangelinta?

Isbeddelada yar ee macluumaadkaaga xiriirka ayaa la sameyn karaa iyada oo la wacayo diiwaanka xafiiska ganacsiga. Waxaad ku cusbooneysiin kartaa is diiwaangelinta onlaynka waqti walba. Waxaad ku joojin kartaa iimayl ama boostada. Faafaahinada ayaa lagu daray baakadda aad ka haleyso boostada kadib marka aad is diiwaangeliso.

## Ma jiraan wax kale oo aan sameeyo si aan isugu diyaariyo xaalad caafimaad oo degdeg ah?

- Ka sameeyso ballan si aad u booqato wakiilkaaga maxaliga ah ee EMS ama waaxda dabka ee cunugaaga ama dhalinyaradaada. Ha ogaadaan ka jawaabayaasha xaaladda degdeg ah inuu cunugaaga ama qofka dhalinyarada ah uu ka diiwaangashan yahay HERO Kids Registry. Haddii aadan garanayn cidda bixisa EMS bixiyaha ee aaggaaga, ama aad u baahan tahay caawimo isku xidh ah, kala xidhiidh Oregon EMS ee Barnaamijka Carruurta 971-673-0564.
- La wadaag Aqoonsiga Diiwaanka Adeeg bixiyaasha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha dugsiga, daryeelayaasha, iyo xubnaha qoyska.
- Dib u eegida Qorshaynta Planning for Health Emergencies toolkit www.oregonfamilytofamily.org.

Macluumaadka dheeriga ah
www.herokidsregistry.org
herokids@ohsu.edu
Xafiiska ganacsiga: 833-770-4376